# DEGMO DUGSIYEEDKA MAGAALADA SYRACUSE
# (SYRACUSE CITY SCHOOL DISTRICT)
Jaime Alicea, Maamulaha Guud ee Dugsiyada

---

**Waaxda Diiwaan galinta Ardayda** **Akua A. Goodrich, Agaasime**

Waalidka Qaaliga ahaaw ama Qofka Masuuliyada Waalidnimo Ka saaran tahay Ilmaha:

Waad ku mahadsan tahay xiisaynta Syracuse City School District. Fadlan keen xogta soo socota oo ay la socdaan dukumiintiyada diiwaan gelinta si aan uga diiwaan gelino cunugaaga dugsiyada Degmada.

## CADDAYNTA DAGANAANSHAHA:

Fadlan keen caddaynta meesha aad ka dagan tihiin adigga iyo cunugaagu Degmada dugsiga. Caddaynta waxaa ku jiri kara:

1) Koobiga heshiiska kirada guriga ama cadaynta mulkiyada guriga ama filada, sida cadaynta sabar loogada ama lacagta daynta guriga;
2) Cadayn kasoo baxday mulkiilaha saddexaad, qofka guriga leh ama kiraysta ay waalidka ama qofka masuulka ka ah ilmuhu ka kiraystay ama ay la wadaagaan guriga ku dhex yaala Degmada, kaasoo noqon kara mid la dhaarshay ama aan la dhaarin; ama
3) Cadayn kasta oo kale oo ka timaada qolo saddexaad taasoo muujinaysa guriga rasmiga ah ee waalidka ama masuulka ardaygu ka dagan yahay Degmada.

Haddii dukumiintiyada kor ku qoran aan la heli karin, Degmada ayaa ka baaraan dagi doonta noocyo kale oo dukumiintiyo ah ayna ku jiri karaan, laakiin aan ku koobnayn:

- risiidka mushaharka;
- foomka canshuurta dakhliga;
- biilasha adeegyada guriga ama biilal kale;
- dukumiintiyada xubinimada (tusaale, kaarka maktabada) oo lagu saleeyay meesha aad dagan tahay;
- dukumiintiga diiwaan gelinta cod bixiyaha;
- ruqsada darawalnimada, oggolaanshaha ardayga ama aqoonsiga aan la xariirin darawalnimada;
- Aqoonsi kasoo baxay gobalka ama waax kale oo dawladeed;
- dukumiintiyada kasoo baxay wakaaladaha federaalka, kuwa gobalka ama kuwa maxaliga ah (tusaale, wakaalada adeegga bulshada ee maxaliga ah, Xafiiska Federaalka ee Dib u dajinta Qaxootiga); ama

cadaynta inaad masuul ka tahay ilmaha, ayna ku jiraan laakiin aan ku koobnayn amarada masuuliyada ilmaha ee maxkamadu xukuntay ama waraaqaha muujinaaya inaad masuul ka tahay.

Degmada ayaa sidoo kale qasab uga dhigi karta waalidiinta inay keenaan cadaynta midkood:

1) cadaynaaya inay yihiin waalidka ilmuhu sida sharciga ah ula nool yahay; ama

2) cadaynaaya inay yihiin shaqsiyaadka masuuliyada waalidnimo ka saaran tahay ilmaha, kaasoo ay leeyihiin masuuliyada iyo waalidnimada rasmiga ah ee ilmaha, qeexaayana sida ay ku heleen masuuliyada rasmiga ah iyo maamulka ilmaha, haddii ay tahay masuuliyad loo xilsaaray ama qaab kale.

Degmadu waxay aqbali doontaa cadayn kale, sida dukumiintiyo muujinaaya in ilmuhu la dagan yahay qof lagu masruufo oo ay u dhiibtay wakaalad federaal ah.

## CADDAYNTA DA'DA:

Degmadu waxay doonaysaa dukumiinti iyo/ama xog muujinaysa da'da cunugaaga. Fadlan keen shahaadada la cadeeyay ee dhalashada ama diiwaanka gardaadinta (ayna ku jirto shahaadada la cadeeyay ee dhalashada wadanka shisheeye ama diiwaanka gardaadinta) taasoo ay ku qoran tahay taariikhda dhalashadu. Marka aan la heli karin dukumiintiyadaan, baasaboor (uuna ku jiro kan wadanka shisheeye) ayaa la adeegsan karaa.

Markaan la heli karin shahaadooyinka Dhalashada ama baasaboor, Degmadu waxay ka fiirsan kartaa cadayn kale oo gaar ah, taasoo jirtay laba sano ama ka badan. Cadaynta kale waxaa ku jiri kara, laakiin aan ku koobnayn, waxyaabaha soo socda:

- ruqsada rasmiga ah ee darawalnimada;
- aqoonsi kasoo baxay gobalka ama waax kale oo dawladeed;
- aqoonsiga sawirka leh ee dugsiga oo ay ku qoran tahay taariikhda dhalashada;
- kaarka aqoonsiga qulsuliyada;
- diiwaanada isbitaalka ama caafimaadka;
- kaarka aqoonsiga ku tiirsanaanta milatariga;
- dukumiintiyada kasoo baxay wakaaladaha federaalka, kuwa gobalka ama kuwa maxaliga ah (tusaale, wakaalada adeegga bulshada ee maxaliga ah, Xafiiska Federaalka ee Dib u dajinta Qaxootiga);
- amarada maxkamadda ama dukumiintiyada kale ee maxkamaddu soo saartay;
- Dukumiintiga Qabiil Aasal ah oo Ameerikaan ah; ama

diiwaanada kasoo baxay wakaaladaha caalamiga ah ee gurmadka khayriga ah iyo wakaaladaha mutadawiciinta.

## CADDAYNTA TALAALKA IYO BAARITAANKA JIRKA:

Sida ku cad Sharciga Caafimaadka Dadwaynaha ee Gobalka New York, Degmada waxaa qasab ku ah sidoo kale inay hesho cadaynta in cunugaaga la talaalay si waafaqsan Shuruudaha Talaalka ee Laanta Talaallada u qaabilsan Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha ee Gobalka New York oo shardi ku ah Gelitaanka/Xaadirista dugsiga. Diiwaannadaan ayaa muhiim u ahaan doona xaqiijinta in cunugaagu sii wado ka qaybgalka dugsiga. Waxaa intaas dheer, fadlan noo keen diiwaannada baaritaan kasta oo dhawaan lagu sameeyay jirka ardaygaaga. Gobalka New York ayaa waajib ka dhigaaya in arday kasta oo galaaya dugsi dadwayne uu maro baaritaanka jirka marka uu galaayo Degmada. Baaritaanka jirka oo la sameeyay muddo ka yar laba iyo toban billood kahor maalinta koobaad ee uu dugsiga galaayo ayaa buuxinaaya shardigaan.

## OGAYSIISKA XAQUUQAHA KU AADAN U GUDBINTA QIIMAYNTA WAXBARASHADA GAARKA AH:

Haddii aad isleedahay cunugaagu wuxuu u baahan yahay adeegyada ama barnaamijyada waxbarashada gaarka ah, waxaad cunugaaga u gudbin kartaa Gudiga Degmada u Qaabilsan Waxbarashada Gaarka ah si ay qiimayn ugu sameeyaan. Gudbinta waa in loo diraa **Agaasimaha Waxbarashada Gaarka ah**, looguna diraa ciwaanka soo socda: **Syracuse City School District, Department of Special Education, 725 Harrison Street, Syracuse, New York, 13210**. Webseetka Waaxda Waxbarashada Gobalka New York ayaad ka helaysaa xog ku aadan hanaankaan iyo xaquuqahaaga. Nuqulka Tusmada Waalidka ee Waaxda Waxbarashada Gaarka ah ayaa laga heli karaa webseetka soo socda ama markaad codsi qoraal u dirto Waaxda Waxbarashada Gaarka ah.

**http://www.p12.nysed.gov/specialed/publications/policy/parentguide.htm**
http://www.p12.nysed.gov/specialed/publications/policy/spanishparentguide.htm

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto xogtaan, fadlan la xariir Waaxda Diiwaan galinta Ardayda oo aad ka wacayso (315) 435-4545. Waad mahadsantahay.

Daacadnimo,



Jaime Alicea
oo ah Maamulaha Guud ee Dugsiyada

# SHURUUDAHA DIIWAAN GELINTA

**Syracuse City School District ayaa ka doonaysa waalidiinta ama shaqsiyaadka masuulka ka ah ilmaha inay keenaan dukumiintiyada soo socda marka ay ilmo ka diiwaan gelinayaa dugsiga:**

## A. Caddaynta Ciwaanka Guriga (1 dukumiinti ayaa loo baahan yahay)

Syracuse City School District waxay codsanaysaa in lasoo gudbiyo hal cadayn oo ciwaanka guriga ah. Dukumiintiga waa inay ku qoran yihiin magaca waalidka ama masuulka ilmaha waana inay ku taariikhsan tahay muddo ka yar 30 maalmood kahor marka ilmaha la diiwaan gelinaayo.

1. Koobiga heshiiska kirada guriga ama cadaynta mulkiyada guriga ama filada, sida cadaynta sabar loogada ama lacagta daynta guriga; ama
2. Cadayn saxiixan oo kasoo baxday mulkiilaha saddexaad, qofka guriga leh ama kiraysta ay waalidka ama qofka masuulka ka ah ilmuhu ka kiraystay ama ay la wadaagaan guriga ku dhex yaala Degmada, kaasoo noqon kara mid la dhaariyay ama aan la dhaarin; ama
3. Cadayn kale oo saxiixan oo ka timaada qolo saddexaad taasoo muujinaysa guriga rasmiga ah ee waalidka ama masuulka ardaygu ka dagan yahay Degmada

**FADLAN OGOOW: Haddii dukumiintiyada kor ku qoran aan la heli karin, Degmada ayaa ka baaraan dagi doonta noocyo kale oo dukumiintiga meesha qofku dagan yahay, ayna ku jiri karaan, laakiin aan ku koobnayn waxyaabaha soo socda:**

- Risiidka mushaharka
- Foomka canshuurta dakhliga
- Biilasha adeegyada guriga ama biilal kale
- Dukumiintiyada Xubinimada ee ku salaysan meesha qofku dagan yahay
- Dukumiintiga diiwaan gelinta cod bixiyaha
- Ruqsada rasmiga ah ee darawalnimada, ogolaanshaha ardayga, ama aqoonsiga aan la xariirin darawalnimada;
- Aqoonsi kasoo baxay gobalka ama waax kale oo dawladeed ama dukumiintiyo la xariira adeegyada ama gunnooyinka dawlada
- Dukumiintiyada kasoo baxay wakaaladaha federaalka, kuwa gobalka ama kuwa maxaliga ah (tusaale, wakaalada adeegga bulshada ee maxaliga ah, Xafiiska Federaalka ee Dib u dajinta Qaxootiga)
- Cadaynta inaad masuul ka tahay ilmaha, ayna ku jiraan laakiin aan ku koobnayn amarada masuuliyada ilmaha ee maxkamadu xukuntay ama waraaqaha muujinaaya inaad masuul ka tahay

**OGAYSIIS MUHIIM AH: CADDAYNTA MASUULIYADA AMA WAALIDNIMADA ILMAHA**

Degmada ayaa sidoo kale qasab uga dhigi karta waalidiinta ama qofka masuulka ka ah ilmaha inay keenaan cadaynta midkood:

1. cadaynaaya inay yihiin waalidka ilmuhu sida sharciga ah ula nool yahay; ama
2. cadaynaaya inay yihiin shaqsiyaadka masuuliyada waalidnimo ka saaran tahay ilmaha, kaasoo ay leeyihiin masuuliyada iyo waalidnimada rasmiga ah ee ilmaha, qeexaayana sida ay ku heleen masuuliyada rasmiga ah iyo maamulka ilmaha, haddii ay tahay masuuliyad loo xilsaaray ama qaab kale.

Degmadu waxay aqbali doontaa cadayn kale, sida dukumiintiyo muujinaaya in ilmuhu la dagan yahay qof lagu masruufo oo ay u dhiibtay wakaalad federaal ah, haddii ay jirto.

## B. Caddaynta Da'da (1 dukumiinti ayaa loo baahan yahay)

1. Fadlan **keen shahaadada la cadeeyay ee dhalashada** ama **diiwaanka gardaadinta**, ayna ku jirto shahaadada la cadeeyay ee dhalashada wadanka shisheeye ama shahaadada gardaadinta.
2. *Haddii* shahaadada la xaqiijiyay ee dhalashada ama diiwaanka gardaadinta aan la heli karin, *markaas* Degmadu waxay aqbali doontaa **baasaboor la xaqiijiyay**, uuna ku jiro baasaboor shisheeye, si loo xaqiijiyo da'da.
3. *Haddii* aan la heli karin midkoodna, shahaadada la xaqiijiyay ee dhalashada ama diiwaanka barbaarinta, ama baasaboor, *markaas* degmada ayaa aqbalaysa **dukumiintiyo kale**, ayna ku jiraan laakiin aan ku koobnayn noocyada ku jira liiskaan, marka la hubiyo in dukumiintiyadaas ay jireen muddo laba (2) sano ah ama ka badan:
   - Ruqsada rasmiga ah ee darawalnimada ilmaha;
   - Aqoonsi kasoo baxay gobalka ama waax kale oo dawladeed;
   - Aqoonsiga sawirka leh ee dugsiga oo ay ku qoran tahay taariikhda dhalashada;
   - Kaarka aqoonsiga qulsuliyada;
   - Diiwaanada isbitaalka ama caafimaadka;
   - Kaarka aqoonsiga ku tiirsanaanta milatariga;
   - Dukumiintiyada kasoo baxay wakaaladaha federaalka, kuwa gobalka ama kuwa maxaliga ah (tusaale, wakaalada adeegga bulshada ee maxaliga ah, Xafiiska Federaalka ee Dib u dajinta Qaxootiga);
   - Amarada maxkamadda ama dukumiintiyada ay maxkamaddu soo saartay;
   - Dukumiintiyada Qabiil Aasal Ameerikaan ah; ama
   - Diiwaanada kasoo baxay wakaaladaha caalamiga ah ee gurmadka khayriga ah iyo ururada mutadawiciinta.

## C. Diiwaannada Talaalada iyo Baaritaanka Caafimaadka Jirka

Waxa qasab ah in Degmadu hesho cadaynta talaalka, sida shardigu ku ah Qodobka 2164(7) ee Sharciga Caafimaadka Dadwaynaha ee Gobalka New York, ama shardi dhaafka sharciga ah, kahor intaan ardaygu dhigan dugsiga.

Shuruudahaas waxaa sidoo kale laga akhrin karaa Xeerka Gudigga 7022. Sidaas awgeed, degmadu waxay doonaysaa waxyaabaha soo socda:

- Diiwaanka Baaritaanada Jirka (oo uu saxiixay dhakhtar ama shaqaale caafimaad)
- Talaallo Waqtigii loogu talagalay ah

**OGAYSIIS MUHIIM AH:** Degmada ayaa dugsiga ka saari karta arday kasta oo aan lasoo gudbin diiwaannada talaaladiisii qasabka ah. Degmadu waxay codsanaysaa in qoysasku ay keenaan koobiga kaarka balanta ama waraaqda taariikhda balanta haddii ardaygu uusan qabin talaalkii saxda ah. Degmada ayaa sidoo kale ka saari karta dugsiga arday horay u diiwaan gashanaa marka uu ardaygu qabo xanuun ama caabuq faafa oo keenaaya khatarta ku faafinta caabuqa ardayda kale, sida ku cad Qodobka 906 ee Sharciga Waxbarashada Gobalka New York.

Ardayda waxaa loo ogol yahay 14 maalmood laga bilaabo taariikhda ay bilaabeen dugsiga inay qaataan talaallada qasabka ah kahor intaan dugsiga laga saarin. Ardayda qaxootiga ah iyo ardayda ka yimid banaanka gobalka waxaa la siinayaa 30 maalmood, marka degmadu hesho dukumiintiga Dadaalka Daacada ah (GFE) sida kaarka balanta ama cadayn kale oo kasoo baxday xafiiska dhakhtarka ay ku jirto taariikhda balanta.

## D. Dukumiinti Dheeraad ah

Syracuse City School District waxay codsanaysaa soo gudbinta kaarkii u danbeeyay ee warbixinta ama shahaadada carruurta galaaya fasalada 1 aad ilaa 12 aad. Cadaynta Barnaamijka Waxbarasha Gaarka ah (IEP) ee hadda socda waa in loosoo gudbiyaa dhammaan carruurta hela adeegyada waxbarashada gaarka ah. Tani waxay u sahlaysaa degmada inay xaqiijiso in ardayga la geeyo fasalka ku habboon, lana siiyo adeegyada iyo taageerooyinka si loo buuxsho baahiyaha cunug kasta. Haddii aan la heli karin xogta waqtiga diiwaan gelinta, degmada ayaa codsanaysa diiwaannada ay hayaan dugsigii uu horay uga qornaa ardaygu si loo helo dukumiintiga loo baahan yahay.

**SYRACUSE CITY SCHOOL DISTRICT**
Waaxda Diiwaan galinta Ardayda
Jaime Alicea, Maamulaha Guud ee Dugsiyada

# McKinney–Vento Act
# Foomka Su'aalaha Ogaysiiska Guriyaynta PreK-12

**XOGTA ARDAYGA**

| Magaca Saddexaad | Magaca Koobaad | Magaca Labaad |
|---|---|---|
| | | |

| Dugsiga Hadda | Degmada uu Kasoo jeedo | Fasalka |
|---|---|---|
| | | |

| Nambarka Aqoonsiga Ardayga | Taariikhda Dhalashada | Jinsiga |
|---|---|---|
| | | ☐ Lab ☐ Dhedig ☐ Nooc kale |

| Ciwaanka GURIGA Cusub | Ciwaanka Boostada |
|---|---|
| | |

| Haa | Maya | | Magaca Waalidka, Masuulka, Ardayga aan Waalidku La socon | Telefoonka |
|---|---|---|---|---|
| ☐ | ☐ | Qoyska oo dhan ma waxay joogaan ciwaanka GURIGA cusub? | | |
| ☐ | ☐ | Ma ogaysiisay dugsiga ay dhigtaan ilmaha la dhashay ardayga? | **Taariikhda La ogaysiiyay Waaxda Gaadiidka** | |
| ☐ | ☐ | Guriga hadda aad dagan tihiin ma mid aad si ku meel gaar ah u joogaysaan baa? | | |
| ☐ | ☐ | Haddii ay tahay HAA, ma waxaa sababay inaad lumiseen gurigiinii ama dhaqaale la'aan? | ***Ardaygu wuxuu si ootomaatig ah ugu qalmaa Cuntooyinka Dugsiga oo Bilaash ah** | |

**HOOYGA:** **Xagee ayuu ardaygu hadda ku nool yahay? (Fadlan tig saar hal god).**

- ☐ **Hooy aan rasmi ahayn (S)**
- ☐ **Guriga labada Waalid (D)**
  Qoys kale ama qof kale sabab la xariirta inaad lumiseen gurigiinii, culays dhaqaale ama sabab kuwaas lamid ah (oo sidoo kale loo yaqaano nolosha ku meel gaarka ah)
- ☐ **Hudheel ama albeergo (H)**
- ☐ **Xaalad Kale oo Nolol Ku meel Gaar ah (O)**
  Gudaha gaari, jardiino, xarunta tareenka, xero, ama goob dadwayne ama gaar loo leeyahay oo aan loogu talagalin, ama caadiyan loo isticmaalin hooyga caadiga ah ee ay seexdaan dadku
- ☐ **Guri Rasmi ah (P)**
- ☐ **Meelaynta Tooska ah CPS**
- ☐ **Xarun Daryeel (Fadlan hoos ka dooro midda ay tahay)**
  - ☐ *Xarunta Taageerada Qoyska (960 Salt Springs Road)*
  - ☐ *Daryeelka Ilmaha ama Dhalinta Dhibaatada ku jira (650 Madison Street)*

**Haddii AAN ardaygu ku noolayn Guri Rasmi ah (P), fadlan sidoo kale sheeg haddii dookhyada hoose quseeyaan:**

- ☐ **Ilmo aan waalidkiis la socon (U)**
  Da' kasta, oo uusan la socon waalid

**WALAALAHA ARDAYGA:** **Dhammaan walaalihiis ma waxay ku nool yihiin isku guri?** ☐ Haa ☐ Maya

| # | | |
|---|---|---|
| 1 | Magaca Walaalka | |
| | Dugsiga | Ma loo sheegay Dugsiga? ☐ Haa ☐ Maya |
| | Ciwaanka guriga Hadda | |
| | Ma isku guri baa? ☐ Haa ☐ Maya | ☐ Rasmi ah ☐ Ku meel gaar ah |
| 2 | Magaca Walaalka | |
| | Dugsiga | Ma loo sheegay Dugsiga? ☐ Haa ☐ Maya |
| | Ciwaanka guriga Hadda | |
| | Ma isku guri baa? ☐ Haa ☐ Maya | ☐ Rasmi ah ☐ Ku meel gaar ah |
| 3 | Magaca Walaalka | |
| | Dugsiga | Ma loo sheegay Dugsiga? ☐ Haa ☐ Maya |
| | Ciwaanka guriga Hadda | |
| | Ma isku guri baa? ☐ Haa ☐ Maya | ☐ Rasmi ah ☐ Ku meel gaar ah |
| 4 | Magaca Walaalka | |
| | Dugsiga | Ma loo sheegay Dugsiga? ☐ Haa ☐ Maya |
| | Ciwaanka guriga Hadda | |
| | Ma isku guri baa? ☐ Haa ☐ Maya | ☐ Rasmi ah ☐ Ku meel gaar ah |

**SCHOOL AND AGENCY STAFF:** Email this form and STAC 202 to Registration@scsd.us and cc: dmontroy@scsd.us

**Name (Person Completing this Form):** ______________________ **Date:** ____________

**Agency:** ______________________ **Phone:** ____________

# BARNAAMIJKA WAXBARASHADA MUHAAJIRIINTA EE GOBALKA NEW YORK

## (NEW YORK STATE MIGRANT EDUCATION PROGRAM)

### XOG ARUURINTA XAFIISKA AQOONSIGA IYO SHAQAALAYSIINTA EE WAALIDKA

The Migrant Education Program (MEP) waxaa lagu amray Cinwanka I, Farqada C ee Sharciga Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare (ESEA). MEP wuxuu bixiyaa adeegyada waxbarashada oo kala duwan lana siiyo qoysaska ka shaqeeya beeraha, **ayadoon laga eegayn wadanka ay u dhasheen ama aqoonsigooda sharci**. Barnaamijkaan **waa mid ay bilaash** ku helayaan dhammaan qoysaska u qalma waxaana ku jiri kara casharo gaar ah, u qalmida qadada bilaashka ah ee dugsiga, socdaalada kooban ee waxbarashada, barnaamijyada xagaaga, shaqooyinka doorsiinta waalidka, baahiyaha gaarka ah iyo u gudbinta adeegyada kale marka loo baahdo.

***Fadlan geli dhawr daqiiqo si aad u buuxiso foomkaan su'aalaha.***

**Ma jiraa qof qoyskaaga kamid ah oo ka shaqeeyay, ama raadiyay inuu ka shaqeeyo shaqooyinka soo socda intii lagu jiray 3 sano ee lasoo dhaafay?**

- ☐ Shaqo kasta oo wax beerid ah, mid beereed, ama kaluumaysi (sida haynta doorada, caanaha xoolaha, miraha iyo khudaarta la beero, hilibka digaaga, kaluunka, beerista ubaxyada/geedo beerista, iwm.)
- ☐ Shaqo la xariirta alwaax samaynta, beero gurista, ama beerista koobaad ee geedaha.
- ☐ Shaqo laga shaqaynaayo warshad cuntada soo saarta, (sida warshada hilibka ama digaaga, baakadayna miraha iyo khudaarta, iwm.)














***Haddii aad ku jawaabto HAA, fadlan hoos noogu reeb meesha lagaalasoo xariiraayo:***

Magaca Waalidka/masuulka: ______________________________

Ciwaanka guriga: ______________________________

Nambarka taleefanka: (_______)-________-__________

Xiliga ugu fiican ee lagusoo wici karo: ______________________ ◯ ◯ Subixii/galabkii

Ciiwaankii Hore: ______________________________

Magaca ardayga: ______________________ Da'da __________ Fasalka__________

Magaca ardayga: ______________________ Da'da __________ Fasalka__________

**Si aad gudbintaan u dirto fadlan fakis ugu dir 518-289-5623, ama boostada ugu dir NYS Migrant Education Program- Xafiiska Aqoonsiga iyo Shaqaalaysiinta: 100 Saratoga Village Blvd, Suite 41, Ballston Spa, NY 12020.**

**STATE EDUCATION DEPARTMENT** / THE UNIVERSITY OF THE STATE OF NEW YORK / ALBANY, NY 12234
Office of P-12

Lissette Colón-Collins, Kaaliyaha Gudoomiyaha
Office of Bilingual Education and World Languages
(Xafiiska Waxbarashada Labada Luuqadood iyo Luuqadaha Aduunka)

55 Hanson Place, Room 594
Brooklyn, New York 11217
Taleefanka: (718) 722-2445 / Fakis: (718) 722-2459

89 Washington Avenue, Room 528EB
Albany, New York 12234
(518) 474-8775 / Fakiskz: (518) 474-7948

# Foomka Su'aalaha Luuqada Guriga (HLQ)

*Waalidiinta ama Masuulka qaaliga ahoow: Si aan cunugaaga u siino waxbarashada ugu fiican ee suurtagalka ah, waxaan u baahanahay inaan go'aamino intay ay gaarsiisan tahay fahanka, ku hadalka, akhrinta iyo qorista luuqada Ingiriiska ee ardaygu, iyo sidoo kale taariikhda hore ee dugsiga iyo midda shaqsiga ah. Fadlan buuxi qaybta hoose ee ay ku qoran tahay Taariikhda Aasaaska Luuqada iyo Waxbarashada. Inaad naga caawiso ka jawaabida su'aalahaan ayaan abaal wayn kaaga hayn lahayn.*
*Waad mahadsantahay.*

**Fadlan si qeexan wax u qor markaad buuxinayso qaybtaan.**

| | | |
|---|---|---|
| **MAGACA ARDAYGA:** | | |
| | | |
| *Koobaad* | *Labaad* | *Saddexaad* |
| **TAARIIKHDA DHALASHADA:** | | **JINSIGA :** |
| | | ❑ Lab<br>❑ Dhedig |
| *Bisha* | *Maalinta* | *Sanadka* |
| **XOGTA WAALIDKA/QOFKA MASUULKA KA AH ILMAHA:** | | |
| | | |
| *Magaca Saddexaad* | *Magaca Koobaad* | *Xariirka kala dhaxeeya Ardayga* |

**KOODKHA LUU QADA GURIGA** ____________

## *Asalka Luuqadeed*

*((Fadlan calaamadee dhammaan inta ay quseyso.)*

| | |
|---|---|
| **1. Luuqadahee looga hadlaa guriga ama meesha ardaygu dagan yahay?** | ❑ Ingiriis ❑ Luuqad kale ____________ *sheeg* |
| **2. Maxay ahayd luuqadii koobaad ee cunugaagu bartay?** | ❑ Ingiriis ❑ Luuqad kale ____________ *sheeg* |
| **3. Waa maxay Luuqada Guriga ee mid kasta oo kamid ah waalidka/masuulka?** | ❑ Hooyada ____________ *sheeg* ❑ Aabo ____________ *sheeg*<br>❑ Waalidka ____________ *sheeg* |
| **4. Luuqadahee ayuu cunugaagu fahmayaa?** | ❑ Ingiriis ❑ Luuqad kale ____________ *sheeg* |
| **5. Luuqadahee ayuu cunugaagu ku hadlaa?** | ❑ Ingiriis ❑ Luuqad kale ____________ *sheeg* ❑ Ma hadlo ardaygu |
| **6. Luuqadahee ayuu cunugaagu akhrin karaa?** | ❑ Ingiriis ❑ Luuqad kale ____________ *sheeg* ❑ Wax ma akhriyo |
| **7. Luuqadahee ayuu cunugaagu qori karaa?** | ❑ Ingiriis ❑ Luuqad kale ____________ *sheeg* ❑ Wax ma qoro |

**THIS SECTION TO BE COMPLETED BY DISTRICT IN WHICH STUDENT IS REGISTERED:**

| **SCHOOL DISTRICT INFORMATION:** | | **STUDENT ID NUMBER IN NYS STUDENT INFORMATION SYSTEM:** |
|---|---|---|
| | | |
| *District Name (Number) & School* | *Address* | |



**INGIRIIS**

# Foomka Su'aalaha Luuqada Guriga (HLQ)—Bogga Labaad

## *Taariikhda Waxbarashada*

**8. Sheeg tirada guud ee sanadaha cunugaagu ka diiwaan gashanaa dugsi** ________________

**9. Ma u malaynaysaa in cunugaagu qabi karo dhibaatooyin ama xaalado saamayn ku reebi kara awoodiisa fahanka, ku hadalka, akhrin ama qorista Ingiriiska ama luuqad kale? Haddii ay tahay haa, fadlan qeex.**

*Haa** ❑ *Maya* ❑ *Ma hubo* ❑ ***Haddii ay tahay haa,** fadlan sharaxaad ka bixi: ____________________

Ilaa xad intee le'eg ayaad u malaynaysaa in dhibaatooyinkaan ay daran yihiin? ❑ Fudud ❑ Xoogaa daran ❑ Aad u daran

**10a. Cunugaaga marna ma loo *gudbiyay* qiimaynta waxbarashada gaarka ah waayadii lasoo dhaafay?** ❑ **Maya** ❑ **Haa***

**Fadlan ka jawaab su'aasha 10b ee hoose*

**10b. *Haddii loo gudbiyay qiimayn, cunugu waligiis ma *helay* wax kamid ah adeegyada waxbarashada gaarka ah mudadii lasoo dhaafay?**

❑ **Maya** ❑ **Haa – Qor adeegyada uu helay:**____________________

**Da'da uu adeegyada ku helay** *(Fadlan calaamadee dhammaan inta ay quseyso):*

❑ **Markuu dhashay illaa 3 sano jir (Caawimaada Ilmaha aadka u yar)** ❑ **3 illaa 5 sano (Waxbarashada Gaarka ah)**
❑ **6 sano ama kasii wayn (Waxbarashada Gaarka ah)**

**10c. Cunugaagu ma leeyahay Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah (IEP)?** ❑ **Maya** ❑ **Haa**

**11. Ma jiraan wax kale oo aad isleedahay muhiim ayay u yihiin in dugsigu ka ogaado cunugaaga?** *(tusaale, hibooyin gaar ah, cilado caafimaad, iwm.)*

**12. Luuqadee ayaad doonaysaa inaad ku hesho xogta kaaga imaanaysa dugsiga?** ____________________

______________________________ Bisha: Maalinta: Sanadka:

***Saxiixa Waalidka ama Qofka Masuulka ka ah Ilmaha*** ***Taariikhda***

**Xariira kala dhexeeya ardayga.** ❑ **Hooyo** ❑ **Aabe** ❑ **Mid kale:** ____________________

**OFFICIAL ENTRY ONLY - NAME/POSITION OF PERSONNEL ADMINISTERING HLQ**

**NAME:** ____________________ **POSITION:** ____________________

**IF AN INTERPRETER IS PROVIDED, LIST NAME, POSITION AND CREDENTIALS:**

**NAME/POSITION OF QUALIFIED PERSONNEL REVIEWING HLQ AND CONDUCTING INDIVIDUAL INTERVIEW**

**NAME:** ____________________ **POSITION:** ____________________

**ORAL INTERVIEW NECESSARY:** ❑ **NO** ❑ **YES**

| | |
|---|---|
| ****DATE OF INDIVIDUAL INTERVIEW:** ____________ MO DAY YR. | **OUTCOME OF INDIVIDUAL INTERVIEW:** ❑ ADMINISTER NYSITELL ❑ ENGLISH PROFICIENT ❑ REFER TO LANGUAGE PROFICIENCY TEAM |

**NAME/POSITION OF QUALIFIED PERSONNEL ADMINISTERING NYSITELL**

**NAME:** ____________________ **POSITION:** ____________________

**DATE OF NYSITELL ADMINISTRATION:** ____________ MO. DAY YR.

**PROFICIENCY LEVEL ACHIEVED ON NYSITELL:** ❑ ENTERING ❑ EMERGING ❑ TRANSITIONING ❑ EXPANDING ❑ COMMANDING

**FOR STUDENTS WITH DISABILITIES, LIST ACCOMMODATIONS, IF ANY, ADMINISTERED IN ACCORDANCE WITH IEP PURSUANT TO CSE RECOMMENDATION:**

## Codsiga Diiwaannada

**Taariikhda: ________________**

**Ardayga magaciisu hoos ku qoran yahay ayaa kusoo biiray degmo dugsiyeedkeena.**

**Magaca: ____________________________________ Taariikhda Dhalashada: ____________ Fasalka: ________**

| **Dugsiga Xogta Bixinaaya:** | **Dugsiga Codsanaaya:** |
|---|---|
| Dugsiga: ______________________________________ | Syracuse City School District – Xarunta Diiwaan galinta |
| Ciwaanka: ______________________________________ | Magaca Diiwaanka: ______________________________ |
| Taleefanka: ______________________________________ | Taleefanka: (315) 435-4545 |
| Fakiska: ______________________________________ | Fakiska: (315) 435-6210 |

**Fadlan fakiska u dir ama boostada ku dir diiwaanada soo socda ee diiwaan gelinta:**

1. **Shahaadada hadda**
2. **Buundooyinka xiliga uu dugsigii hore kasoo baxaayay**
3. **Buundooyinka uu ka helay dugsiga xagaaga**
4. **Kaararka buundooyinka ee dugsiyadii hore**
5. **Buundooyinka imtaxaanka Caadiga ah/Gobalka**
6. **Shahaadada Dhalashada**
7. **Talaallada iyo baaritaankii jirka ee ugu danbeeyay**
8. **Diiwaanada anshaxa**
9. **Diiwaannada Waxbarashada Gaarka ah, haddii ay jiraan:**
   A. IEP da hadda
   B. Warbixintii u danbaysay ee caafimaadka dhimirka
   C. 504 (shaqaynaaya ama aan shaqaynayn)
   D. Qiimaynta Hadal
   E. Taariikhda bulshada
   F. Warbixinta adeegyada quseeya ardayga
   G. Haddii aan wali la kala cadayn, waa maxay nooc baarista socota

**Oggolaanshaha Waalidka/masuulka:**

Oggolaanshahayga ayaa siinayaa in diiwaanada waxbarashada iyo/ama dhammaan dukumiintiyada kale ee quseeya lagu wareejiyo Syracuse City School District. Dhammaan xogta degmadu hesho si adag ayaa loo xifdinayaa. Waxaan u fasaxayaa Syracuse City School District inay hesho sharaxaada hadalka ah ee xog kasta ooy hesho**. Sida ku cad Sharciga Xeerarka Kama Danbaysta ah ee Xaquuqaha iyo Sirta Waxbarashada Qoyska (Isbadalkii Buckley) oo soo baxay Juun 17, 1976, hadda kadib qasab maaha in la helo ogolaanshaha shaacinta diiwaannada ay isdhaafsadaan dugsiyadu.**

**Ardaygaan wuxuu u qalmaa McKinney Vento ☐ Haa ama ☐ Maya (fadlan tigsaar godka). Per M-V Qodobka 722 (g)(3)(c); N.Y. Sharciga Waxbarashada Farqada 3209 (2)(3)-(f) shan (5) maalmood gudahood kadib markay hesho codsiga diiwaanada oo uu rabo dugsiga cusub, Degmada uu markii u danbaysay ka qornaa ardaygu waa inay usoo gudbisaa dugsiga cusub dhammaan diiwaannada.**

______________________________________

**Qor Magaca – Waalidka/Masuulka**

______________________________________

**Saxiixa – Waalidka/Masuulka**

**Nambarka Taleefanka Waalidka/Masuulka:**

# DEGMO DUGSIYEEDKA MAGAALADA SYRACUSE
# (SYRACUSE CITY SCHOOL DISTRICT)

Jaime Alicea, Maamulaha Guud ee Dugsiyada

Adeegyada Caafimaadka

**Dr. Ted Triana Agaasimaha Adeegyada Caafimaadka**

Waalidiinta/masuuliyiinta ka qaaliga ahoow:

Waxaan sugaynaa inaan cunugaaga ku soodhawayno sanad dugsiyeed cusub. Waxaan qoraalka usoo diraynaa inaan kuu sheegno isbadal ku dhacay Sharciga Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha ee Gobalka New York. Laga bilaabo **Sibteembar 2018, Gobalka New York State ayaa ka doonaaya arday kasta inuu maro imtaxaanka jirka markuu soo galaayo dugsiga fasalada Pre-K ama K, haddii uu ku cusub yahay degmada dugsiga, iyo fasalada 1, 3, 5, 7, 9 iyo 11.** Haddii ardaygu ciyaaro isboortiga ama u baahan yahay dukumiintiyada shaqada, waa inuu sidoo kale qaataan baaritaanka hadda ee jirka. Dhakhtarka gaarka ah ee qoyskaagu waa inuu baaritaanka sameeyaa. Si fiican ayuu u yaqaanaa cunugaaga wuxuuna cabiri karaa isbadelo kasta oo ku dhaca caafimaadka cunugaaga. Haddii loo baahdo, wuxuu u samayn karaa u gudbinta adeegyada ookiyalaaha, dhakhtarka ilkaha, iwm, isla markaas.

Laga bilaabo **Luuliyo 1, 2018, Gobalka New York ayaa yeelanaaya foom cusub** oo loo adeegsan doono qorista diiwaanka baaritaanka jirka. Nuqul kamid ah foomkaan ayaa lifaaqa ku jira. Dhakhtarka ayaa buuxin kara foomka si oonleen ah ama gacanta ku buuxin kara. Fadlan keen foomka xafiiska kalkaalinta marka aad cunugaaga dugsiga keenayso.

**Baaritaanka jirka ee hadda** waxaa lagu qeexaa baaritaan ku taariikhaysan ugu badnaan toban iyo laba maalmood kahor intuusan bilaaban sanad dugsiyeedka baaritaanka lagu doonaayo. Tusaale, haddii sanad dugsiyeedku biloowdo Sibteembar 3, 2018, baaritaan jireed oo kasta oo la qaaday markay ahayd ama kadib Sibteembar 3, 2017 ayaa la aqbali karaa. Baaritaan la qaaday kahor taariikhdan waxaa loo aqoonsanayaa midaan jirin cunugaagana waxa uu u baahan doonaa baaritaan kale. Waan fahmaynaa in carruurta qaarkood laga yaabo inaanay marin baaritaankooda sanadlaha ah ilaa kadib marka dugsigu biloowdo. Waxaad nuqul u diri kartaa kalkaalisada marka la buuxsho. Fadlan wac dhakhtarkaaga hadda si aad balan u qabsato.

Haddii adigga ama cunugaagu u baahan tihiin caymis caafimaad oo ay ku jiraan Medicaid, Medicaid Managed Care ama Child iyo Family Health Plus, fadlan wac Salvation Army (315-476-1382) ama ACR Health (315-475-2430). Waxaad caawimaad u helaysaa "hage" si uu kaaga caawiyo isqorida. Faa'iidooyinka waxaa ku jira booqashooyinka dhakhtarka; daryeelka isbitaalka iyo xaaladaha degdega ah; araga, adeegyada hadalka iyo maqalka, daawooyinka laguu qoro; caafimaadka dhimirka; mararka qaarna, daryeelka ilkaha.

Waaxda Adeegyada Caafimaadku waxay kaaga mahadcelinaysaa wada shaqayntaada intaan wadno dhaqan gelinta shardigaan cusub. Wixii xog dheeraad ah ama caawimaad ah, fadlan la xariir kalkaalisada dugsigaaga, ama Xafiiska Adeegyada Caafimaadka ood ka wacayso 435-4145.

SYRACUSE CITY SCHOOL DISTRICT
Health Services
Jaime Alicea, Superintendent of Schools

# OGOLAANSHAHA SHAACINTA XOGTA DUGSIGA EE LA SIINAAYO DUGSIYADA

**Fadlan qaybtaan saxiix si aan u helno xogta caafimaadka ee uu hayo dhakhtarka cunugaaga.**

Magaca Ardayga: ______________________________ Taariikhda Dhalashada: ________Taariikhda: __________

Adoo ah waalidka/Masuulka ilmaha magaciisa la sheegay, buuxinta foomkaan waxay u oggolaanaysaa dhakhtarkaaga, ___________________ inuu siiyo xogta sirta ah ee caafimaadka cunugaaga dugsiga ardaygu dhigto. (Magaca Dhakhtarka)

Ujeedada shaacinta xogtaan waa in kor loo qaado isdhaafsiga saxda ah ee xogta caafimaadka iyo isku xirka daryeelka iyo daawaynta ayadoo la kaashanaayo dugsiga ardayga. Tani waa xog muhiim ah sababo badan awgood. Tusaale dugsiga ayaa u baahan kara inay ogaadaan xogtaan si ay u siiyaan daawooyin, ula socdaan xanuunka ilmaha, ayna u joogteeyaan la socoshada talaallada uu qaatay.

Oggolaanshahaan wuxuu ku xadidayaa shaacinta xogta kuwa soo socda:

- ☐ Xogta talaalka
- ☐ Warbixinada baaritaanka jirka
- ☐ Baaritaannada Shaybaadhka
- ☐ Daawooyinka iyo daawaynta loo sameeyay

Foomkaan oggolaanshuhu ma oggolaanaayo in la shaaciyo xogta sirta ah ee caafimaadka ee lagu baxshay sida waafaqsan difaaca gaarka ah ee sharciga. Xogtaan waxaa ku jira xogta la xariirta HIV, xogta isticmaalka maandooriyaha, xogta dhimirka iyo xogta hide sidayaasha; shaacinta xogtaan waxay u baahan tahay foom gaar ah.

Xogta waxaa la siin doonaa dugsiga ku yaala degmada dugsiga ee ee hoos lagu sheegay ilaa inaad noo sheegto maahee inuusan ilmuhu hadda kadib ka qornaan doonin dugsiga. Waxaad ka laaban kartaa oggolaanshahaan xiligaad doonto adoo u sheegaaya dhakhtarka caafimaadka cunuga si qoraal ah. Ka laabashada oggolaanshahaan waxay ka dhigan tahay inaanaan mar danbe xogta ardayga siin doonin dugsigiisa. Caafimaadka ilmaha wax saamayn ah kamasoo gaarayso haddii aadan noo ogolaan inaan xogta siino dugsiga. Si kale haddaan u dhigno, Ma diidi doono daawaynta cunugaaga haddii aadan saxiixin ogolaanshahaan. Xogta aan u sheegno dugsiga uma uu sii gudbin karo dugsiyo kale ilaa in dugsiga uu sharcigu ka doonaayo maahee si loo difaaco sirta xogtaan. Waxaa lagu siin doonaa nuqulka ogolaanshahaan la buuxshay si aad ugu darsato diwaanadaada.

| | |
|---|---|
| ______________________________ Magaca Ilmaha (qor) | ______________________________ Taariikhda Dhalashada |
| ______________________________ Magaca Waalidka/masuulka (Qor) | ______________________________ Xariirka kala dhaxeeya ilamaha |
| ______________________________ Saxiixa Waalidka/Masuulka | ______________________________ Dugsiga |

**Fadlan Kusoo celi Kalkaalisada Dugsiga**

# Foomka Taariikhda Caafimaadka

Taariikhda Ardayga: ______________________ Taariikhda Dhalashada. ________ Jinsiga Lab Dhedig

Taariikhda Maanta ______________ Dugsiga ______________________ Fasalka __________

Ilmahaan waligiis ma ka qaybgalay Dugsiga Magaalada Syracuse? Maya Haa Dugsiga uu dhigto ______________________

Magaca Waalidka/masuulka ______________ Ciwaanka ______________________ Nambarka Taleefanka ______

Magaca Dhakhtarka ______________________________ Goorma ayay ahayd booqashadii ugu danbaysay? ________

Magaca Dhakhtarka Ilkaha _ Goorma ayay ahayd booqashadii ugu danbaysay? ________

Caymiska________________ Medicaid # ______________

**Uurka iyo Dhalmada:** Miisaanka uu Ku dhashay______#______oz. Mudada uu uurka ku jiray______bilaha Foosha:______saacadaha

Nooca dhalmada Caadi u dhashay Qaliinka qaybta Qaliinka dhalmada (C section)? ______________________

**Kobaca iyo Kariimada** *Fadlan ku buuxi da'da cunugaagu*

Fariistay __________ Gurguurtay__________Socday __________ Hadlay__________Musqul galida Bartay ________

**Fadlan sharaxaad kooban ka bixi arimaha soo socda ee quseeya cunugaaga:**

Daawooyinka: ______________________ Xasaasiyaadka Daawada: ______________________

Xasaasiyaadka Cuntada: ______________________________________

Xanuuno Daran: ______________________________________

Shilalka: ______________________________ Taariikhaha: __________

Qaliinada/Isbitaal dhigista/Booqashooyinka ER ______________________ Taariikhaha: __________

**SAX "HAA" ama "MAYA" BOKISYADA HOOSE haddii cunugaagu waligiis dhibaato kala kulmay wax kamid ah kuwa soo socda:**

| Haa | Maya | Xaalad Caafimaad | Haa | Maya | Xaalad Caafimaad |
|---|---|---|---|---|---|
| | | ADHD | | | Cagaarshowga A ama B |
| | | Laga helay Neef | | | Heerarka sunta Maarta oo badan |
| | | Cilado dhanka dabeecada/Dhimirka ah | | | Xadidaada Heerka Shaqada |
| | | Xanuunka Dhiiga/Sickle Cell | | | Qalalka |
| | | Dhibaato dhanka Ilkaha ah | | | Murmuruxa Maqaarka |
| | | Sonkoroowga | | | Dhibaatooyinka Dhanka Hadalka |
| | | Dhibaatooyinka dhagaha | | | Qaaxo |
| | | Ciladaha Indhaha | | | Cilado kale: |
| | | Ciladaha Wadnaha | | | |

***Fadlan sharax wax kamid ah kuwa hore ama ku dar xog dheeraad ah oo naga caawinaysa inaan caawino cunugaaga.***

______________________________________

______________________________________

______________________________________

______________________________________

Qalabka gaarka ah/agabka loo baahan yahay______________________________

Ma jiraan wax dhibaatooyin caafimaad oo waawayn oo xubno kale oo qoysku qabaan? Sharax. ______________________

**KOOBI OO LIFAAQA SOO GELI FOOMKA AAD BUUXISAY EE DIIWAANKA TALAALKA**

# FOOMKA QASABKA AH EE TALAALKA CAAFIMAADKA DUGSIGA

## WAA INUU GABI AHAANBA BUUXSHAA DHAKHTARKA CAAFIMAADKA OO GAAR AH AMA AGAASIMAHA CAAFIMAADKA DUGSIGA

**Ogsoonoow:** NYSED ayaa qasab ka dhigaysa baaritaanka jirka ee ardayda cusub iyo ardayda fasalada Pre-K ama K, 1, 3, 5, 7, 9 iyo 11; sanad kasta si ay uga qaybgalaan ciyaaraha isdhexgalka dugsiyada; iyo dukumiintiyada shaqada marka loo baahdo, ama sida ay dalbadaan Gudigga Waxbarashada Gaarka ah (CSE) ama Gudigga Waxbarashada Gaarka ah ee Dugsiga Barbaarinta (CPSE).

### XOGTA ARDAYGA

| | | |
|---|---|---|
| Magaca: | Jinsiga: ☐ Lab ☐ Dhedig | Taariikhda Dhalashada: |
| Dugsiga: | Fasalka: | Taariikhda Baaritaanka: |

### TAARIIKHDA CAAFIMAADKA

**Xasaasiyaadka** ☐ Maya
☐ Haa, sheeg nooca

☐ Qaabka Daawooyinka/Daawaynta ee Lifaaqa ku jira ☐ Qorshaha Daryeelka AnaphylaxisLifaaqa ku jira
☐ Cuntada ☐ Cayayaanka ☐ Caanaha ☐ Daawada ☐ Deegaanka

**Neefta** ☐ Maya
☐ Haa, sheeg nooca

☐ Qaabka Daawooyinka/Daawaynta ee Lifaaqa ku jira ☐ Qorshaha Daryeelka Neefta ee Lifaaqa ku jira
☐ Mid dhif ah ☐ Mid joogto ah ☐ Nooc kale: ______________________________

**Qalalka** ☐ Maya
☐ Haa, sheeg nooca

☐ Qaabka Daawooyinka/Daawaynta ee Lifaaqa ku jira ☐ Qorshaha Daryeelka AnaphylaxisLifaaqa ku jira
☐ Nooca: ________________ Taariikhda markii u danbaysay ee uu qalal ku dhacay: __________

**Sonkoroowga** ☐ Maya
☐ Haa, sheeg nooca

☐ Qaabka Daawooyinka/Daawaynta ee Lifaaqa ku jira ☐ Qorshaha Maaraynta Caafimaadka Sonkoroowga Oo Lifaaqa u jira
☐ Nooca 1 ☐ Nooca 2 ☐ Natiijooyinka HgbA1c:__________Taariikhda Dhiiga laga qaaday: ______

**Sababaha Khatarta ah ee Sonkoroowga ama Kahor Sonkoroowga:**

*Iskuday inaad ka baarto T2DM hadii BMI% > 85% uuna qabo 2 sababood ama ka badan oo kuwa khatarta horseedaaya ah: Qoyska Hx T2DM, Isirka, Kahortaga Insulinta Sx, Sonkoroowga Hx ee Hooyada; iyo/ama astaamaha biloowga sonkoroowga.*

**BMI**__________kg/m2 **Boqolkiiba (Qaybta Heerka Miisaanka):** ☐ <5aad ☐ 5th-49aad ☐ 50th-84aad ☐ 85th-94aad ☐ 95th-98aad ☐ 99aad iyo<

**Hyperlipidemia:** ☐ Maya ☐ Haa **Dhiigkar:** ☐ Maya ☐ Haa

### BAARITAANKA/QIIMAYNTA CAAFIMAADKA JIRKA

**Jooga:** **Miisaanka:** **BP:** **Garaaca wadnaha:** **Neefsiga:**

| BAARITAANNADA | Laga helay | Laga Waayay | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| PPD/ PRN | ☐ | ☐ | |
| Baaritaanka Himigloobiin dhiiga ku badan /PRN | ☐ | ☐ | |
| **Baaritaanka Heerka Maarta oo laga doonaayo Fasalada Pre- K iyo K** | | | **Taariikhda** |
| ☐ Baaritaanka la sameeyay | ☐ Heerka Maarta oo Sareeya ≥ 10 µg/dL | | |

**Ciladaha Kale ee Caafimaad ee Taagan**

Hal ayaa Shaqaynaysa: ☐ Isha ☐ Kali ☐ Xiniin
☐ Gaba-gabada – Markii u danbaysay ee ay dhacday: __________
☐ Caafimaadka Dhimirka: ______________________
☐ Kale:

☐ **Dib u eegista Nidaamka iyo Baadhitaanka ayaa Gabi Ahaanba Wanaagsan**

**Hubi Bokis Kasta oo Baaritaan *Oo ka baxsan* Xadiyada Caadiga ah oo Hoos ku qor Kuwa aan Caadiga ahayn**

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| ☐ HEENT | ☐ Dhuunta | ☐ Caloosha | ☐ Xubnaha dusha sare | ☐ Hadalka |
| ☐ Caafimaadka Ilkaha | ☐ Murqaha wadnaha | ☐ Dhabarka/Araxda | ☐ Maqaarka | ☐ Dareenka Bulshanimo |
| ☐ Qoorta | ☐ Sambabada | ☐ Baaritaanka xubnaha taranka | ☐ Dhanka Neerfaha | ☐ Dhismaha Murqaha iyo Qalfoofka |

☐ Baaritaanka/Ciladaha la Helay/Talooyinka:

☐ Xog dheeraad ah Ayaa Lifaaqa Ku jirta

| Ciladaha Baaritaanka lagu Helay (Liiska) | Koodka ICD-10 |
|---|---|
| ______________ | ______ |
| ______________ | ______ |
| ______________ | ______ |
| ______________ | ______ |

| Magaca: | | | | Taariikhda Dhalashada: |
|---|---|---|---|---|
| **BAARITAANNADA** | | | | |
| **Araga** | **Midig** | **Bidix** | **Gudbinta** | **Ogaysiisyada** |
| Fogaanta araga | 20/ | 20/ | ☐ Haa ☐ Maya | |
| Fogaanta araga marka uu Ookiyaalo xidho | 20/ | 20/ | | |
| Araga – Araga Waxa dhaw | 20/ | 20/ | | |
| Arag – Midabka ☐ Wuu ku baasay ☐ Wuu fashilmay | | | | |
| **Maqalka** | **Midig** dB | **Bidix** dB | **Gudbinta** | |
| Baaritaanka Nadiifta ah ee Faraha Cagaha | | | ☐ Haa ☐ Maya | |
| **Qalooca laf dhabarta** Waxaa laga doonayaa wiilashada fasalka 9 | **Laga Waayay** | **Laga helay** | **Gudbinta** | |
| Iyo gabdhaha fasalada 5 iyo 7 | ☐ | ☐ | ☐ Haa ☐ Maya | |
| Heerka Leexada: | | Wareegga Xagasha Jirida: | | |

**Tallooyinka:**

**TALOOYINKA KU AADAN KA QAYBGALKA WAXBARASHADA/CIYAARAHA/GAROONKA/SHAQADA TOOSKA LOO TAGAAYO**

☐ **Shaqada Buuxda** bilaa xadidaad ayna ku jiraan Waxbarashada Jirka iyo Ciyaaraha.

☐ **Xadidaadaha/La qabsiyada** — Adeegso Qaybaha Ciyaaraha Is dhexgalka Dugsiyada (ee hoose) si aad u cabirto Xadidaadaha iyo isbadalada

- ☐ **Ciyaaraha aan la istaaban** — **Ayna ku jiraan:** kubada fadhiga, kubada kolleyga, madadaalinta tartanka loo galo, laalacshoowga, ciyaarta barafka, lacrosse, soosarka, softball-ka, kubada laliska, iyo lagdanka
- ☐ **Ciyaaraha aan Agabka ciyaarta La taaban** — **Waxaa ku jira:** qaansada, badminton, falaarta, orodka, wareega cadayska, goolafka, dheesha, xabad ridista
  Ku socoshada kabaha taayirka leh, dabaasha iyo quusida, tayniska, iyo orodka iyo goobta
- ☐ **Xadidaadaha kale:**

☐ **Heerka Kobaca ee Nidaamka Meelaynta Ciyaarta KALIYA**
Fasalada 7 aad iyo 8 aad ee ku dheelaaya heerka dugsi sare **AMA** Fasalada 9-12 oo ku dheelaaya ciyaaraha heerka dugsiga dhexe
Ardayda ku jira **Heerka Qaangaarida:** ☐ I ☐ II ☐ III ☐ IV ☐ V

☐ **Adeegyada:** U adeegso booska hoose ee dheeraadka ah si aad u sharaxdo

| | | |
|---|---|---|
| ☐ Ilko xirista*/Daryeelka cagta | ☐ Qalabka Qasaqda Ka dhuuqa Xiidmaha* | ☐ Qalabka Maqalka kaalmeeya |
| ☐ Bamka Insulinta/ Qalabka dareemida Insulinta* | ☐ Aalada Caafimaadka/Macmalka ah* | ☐ Boos abuuraha/Buufiyaha* |
| ☐ Qalabka Difaaca | ☐ Ookiyaalaha Waawayn ee Difaaca Ciyaaraha | ☐ Kale: |

*Waydii waaxda maamulaysa ciyaaraha haddii oggolaansho hore/buuxinta foom loo baahan yahay si loogu adeegsado aaladaha tartatanada ciyaaraha.

Sharax: ______________________________

**DAAWOOYINKA**

☐ **Foomka Dalabka Daawooyinka ee Dugsigu U baahan yahay ayaa lifaaqa ku jira**

| **Qor daawooyinka guriga loo qaato:** | | |
|---|---|---|
| | | |

**TALLAALLADA**

☐ Diiwaanka Lifaaqa Ku jira ☐ Oo lagusoo wargeliyay NYSIIS Oo maanta La helay: ☐ Haa ☐ Maya

**ADEEG BIXIYAHA CAAFIMAADKA**

| Saxiixa Adeeg Bixiyaha Caafimaadka: | **Taariikhda:** |
|---|---|
| Magaca Adeeg Bixiyaha: *(fadlan qor)* | Tiinbaraha: |
| Ciwaanka Adeeg bixiyaha: | |
| Taleefonka: | |
| Fakiska: | |

**Fadlan ku celi Foomkaan Dugsiga Cunugaaga Marka aad Kuligiis Buuxiso.**

SYRACUSE CITY SCHOOL DISTRICT
Health Services
Jaime Alicea, Superintendent of Schools

# Shahaadada Caafimaadka Ilkaha

Waalidka/masuulka: Sharciga Gobalka New York (Cutubka 281) ayaa u oggolaanaaya dugsiyada inay codsadaan baaritaanka ilkaha marka ardaygu galaayo dugsi bixiya fasalada Pre-K ama K, haddii ardaygu ku cusub yahay dugsiga degmada, iyo markay marayaan fasalada 1,3,5,7,9, iyo 11. Fadlan buuxi Qaybta 1 aad kadibna **u gee foomkaan dhakhtarkaaga ilkaha si uu u baaro ilkaha**. Haddii cunugaagu maray baaritaanka ilkaha kahor intuusan bilaabin dugsiga, ka codso dhakhtarkaaga ilkaha inuu buuxsho Qaybta 2 aad. Ku celi foomka la buuxshay agaasimaha Caafimaadka ee dugsiga ama kalkaalisada Dugsiga sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah.

## Qaybaha 1 aad. Waa inuu buuxshaa Waalidka ama Masuulka ilmuhu (Fadlan Qor)

Magaca Ilmaha: Magaca Ugu danbeeya Kan koobaad Kan Dhexe

| | | |
|---|---|---|
| Taariikhda dhalashada: | Jinsiga: ☐ Lab ☐ Dhedig | Tani ma noqon doontaa booqashadii koobaad ee cunugaagu ku tago dhakhtarka ilkaha? ☐ Haa ☐ Maya |
| Dugsiga: | | Fasalka |

Ma ogaatay wax cilad ah oo ka jira afka oo caqabad ku ah awooda cunugaaga ee wax ruugista, hadalka ama diirad saarida shaqooyinka dugsiga? ☐ Haa ☐ Maya

Waan fahmayaa in markaan saxiixo foomkaan aan u ogolaanaayo in cunuga magaciisu kor ku xusan yahay uu helo qiimaynta caadiga ah ee caafimaadka afka. Waan fahmayaa in baaritaankaan uu kaliya yahay qayb yar oo kamid ah qiimaynta si loo hubiyo caafimaadka ilkaha ee ardayga, aana u baahan doono inaan u raadsho adeegyada dhakhtarka ilkaha si cunugaygu u helo baaritaanka buuxa ee ilkaha oo wata raajo haddii loo baahdo si loo dhawro caafimaadka wanaagsan ee afkiisa.

Waxaan sidoo kale fahmayaa in helitaanka baaritaanka hore ee caafimaadka afku uusan abuurayn xariir cusub, joogto ah ama sii soconaaya oo u dhaxeeya bukaanka iyo dhakhtarka. Waxaa intaas dheer, uma qabsan doono dhakhtarka ilkaha ama dadka samaynaaya baaritaanka masuuliyada cawaaqibyada ama natiijooyinka ka dhasha baarista haddii aan doorto INAANAN raacin tallooyinka hoos ku qoran.

Saxiixa Waalidka ____________________________________________Taariikhda ____________________

## Qaybaha 2 aad. Waxaa Buuxinaaya Dhakhtarka ilkaha

**I. Xaalada caafimaadka Ilkaha ee________________________________markay ahayd________(taariikhda baaritaanka)**
**Taariikhda baaritaanku waa inuu noqdaa 12 bilood gudahood mudada sanad dugsiyeedka codsiga la diraayo biloowday. Mid sax:**

☐ Haa, Ardayga kor ku qoran xaaladiisa caafimaadka ilkuhu waa mid wanaagsan wuuna ka qaybgeli karaa dugsiyada dadwaynaha.

☐ Maya, Ardayga kor ku qoran xaaladiisa caafimaadka ilkuhu ma wanaagsana kamana qaybgeli karo dugsiyada dadwaynaha.

**Ogsoonoow:** Xaalad caafimaadka ilkaha oon ilmuhu dugsiga geli karin waxay ka dhigan tahay inay jirto cilad caqabad ku ah awooda ardayga ee raaminta, hadalka ama diirad saarida shaqooyinka dugsiga ayna ku jiraan, barar ama caabuq la xariira cadayn caafimaad oo muujinaysa bolol ilig oo furan. Cadaynta ah inuu ardaygu qabo cilad caafimaadka ilkaha oo aan fiicnayn si uu uga qaybgalo dugsiga dadwaynaha kama reebayso ardayga inuu dugsiga dhigto.

Magaca iyo ciwaanka dhakhtarka ilkaha **(fadlan tiinbaraha saar)** Saxiixa Dhakhtarka Iikaha

***Qaybaha Ikhtiyaariga ah - Haddii aad aqbasho in xogtaan la siiyo dugsiga cunugaaga, fadlan halkaan saxiix.***

### II. Xaalada Caafimaadka Iikaha (tig saar dhammaan meelaha quseeya).

☐ Haa ☐ Maya**Khibrada Caabuqa/Taariikhda Buuxinta Iikaha –** Ilmuhu marna ma qaaday bololka ilkaha (la daaweeyay ama aan la daawayn? [Buuxin (ku meel gaar ah/rasmi ah) AMA ilig] maqan sabab la xariirta in laga bixiyay markuu caabuq galay AMA bolol furan].

☐ Haa ☐ Maya **Caabuqyada aan La daawayn –** Cunugaan ma qabaa bolol ilig uu furan? [Ugu yaraan ½ mm kamid ah dhismaha iliga oo lumay dusha sare. Midabka Buni illaa madoow baroow ah oo ka muuqda dusha ilkaha. Astaamahaan waxay qsueeyaan duleelada iyo dusha ilkaha bololay iyo sidoo kale saaran ciridka. Haddii ay salka ka gasho, waxaa loo aqoonsadaa in iliga dhan bololku burburiyay. Iikaha jaban ama faliidh ka jabay, iyo buuxinta ilkaha ee ku meel gaarka ah, ayaa loo aqoonsadaa kuwo badqaba ilaa in dahaar bolol galay uu sidoo kale jiro maahee].

☐ Haa ☐ Maya **Ningaxyada Ilkaha ee Jira**

Cilado kale (Sheeg):______________________________________________________________________

### III. Baahiyaha Daawaynta (hubi dhammaan meelaha quseeya)

☐ Ma jirto cilad muuqata. Daryeelka ilkaha ee joogtada ah ayaa loo baahan yahay. Si joogto ah u booqo dhakhtarkaaga ilkaha.

☐ Waxaad u baahan kartaa daryeelka ilkaha. Fadlan balan ka qabso dhakhtarkaaga ilkaha sida ugu dhakhsaha badan si laguu baaro.

☐ Daryeelka ilkaha oo degdeg ah ayaa loo baahan yahay. Fadlan balan ka qabso dhakhtarkaaga ilkaha si degdeg ah si looga fogaado cilado

725 Harrison Street, Syracuse, NY 13210 | T (315) 435-4145 | F (315) 435-4859 | HealthServices@scsd.us | syracusecityschools.com

**XARUMAHA BAXSHA DARYEELKA ILKAHA**

| **Adeeg Bixiyaha** | **Ciwaanka** | **Taleefanka** |
|---|---|---|
| | | |
| Loretto Geriatric Center | 700 E. Brighton Ave. | (315) 469-5561 |
| St. Joseph's Hospital Health Center | 301 Prospect Ave. | (315) 448-5477 |
| Syracuse Community Health Center | 819 S. Salina St. | (315) 476-7921 |
| Syracuse Community Health Center | 1938 E. Fayette St. | (315) 474-4077 |
| Syracuse Community Health Center | 603 Oswego St. | (315) 424-0800 |
| University Hospital SUNY Health Science Center | 750 E. Adams St. | (315) 464-4320 |